

<u>Ku Wareejinta Ilmahaaga Iskuulka</u>

- 1. Hubi in ilmahaagu u gelayo iskulka dawladda ama kan kaatoliga.
- 2. Ka hubi iskuulka deegaankaaga in canshuurta aad bixisid ay aado qaybta waxbarashada ee ilmahaagu ay aadaan.
- 3. Ka diiwaan geli ilmahaaga iskuulka xaafaddaada (iskuulka beesha ee deegaankaaga).
 - Xaqiiji inaad keentid: warqadda dhalasha ee ilmahaaga ama caaddeyn agoonsi
 - Kaarka Caafimaadka ee Ontario iyo rekorka tallaalka
 - Lambarkaaga telefoonka iyo caddeyn meesha aad deeggan tahay
 - Qofka lala xiriiri karo waqtiga dhibaatada iyo telefoon lambarkiisa
 - Warqadda kiniisadda ee ilmaha (haddii laga diiwan gelinayo iskuuladda guddonka gaarka)
- 4. Maamulaha iskuulka la socodsii ilmahaaga una sheeg adeegyada taakuleynta ee ilmahaagu u helo iyo wixii kale ee qiimeyn ah ee lagu sameeyey.
- 5. Maamulaha iskuulka kala dood mustaqbalka waxbarasho ee ilmahaaga weydiina tallaaboyinka iyo wixii kale ee loo baahan yahay.
- 6. Booqo wixii barnaamijyo kale ee suurogal ah si aad u ogaatid barnaamijka aad isleedahay wuu ku habboon yahay ilmahaaga. Haddi ay suurogal kuu tahay, kaxeyso qof ku caawiyo mararka aad booganayeso iskuulka.
- 7. Waxaa suurogal ah inaad ka qaybqaadatid kulannada I.P.R.C (caddeyn, meelayn iyo guddiga falanqeynta) ee sugidda meeleynta iskuul ee ilmahaaga. Waa aad keeni karta wax alla wixii macluumaad ah ee aad isleedahay waa ku munaasab kulanka iyo ciddii kale ee kugu taakuleysa kaalmada ilamaha.